



Ref: MOF/OM/0216/2025

July 30, 2025

**Xeer-nidaamiyaha Jaangoynta Khidmaddaha Adeegyada Hay'adda
Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed**

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee DFS;

Isagoo tixraacaya: Faqradda 1(b) ee Qodobka 6-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, kaasoo awood u siinaysa Wasiirka Maaliyadda inuu dejiyo ama beddelo tacriifadaha khidmadaha ee la xiriira adeegyada ay bixiyaan hay'adaha Dawladda;

Isagoo tixraacaya: Qodobka 3-aad ee Qaraarka Mamnuucidda in Dakhli Dawladeed Lagu Shubo ama Lagu Hayo Koonto Banki ee aan ahayn Khasnadda Mideysan (TSA) ee Golaha Wasiiradu soo saareen 21 Agoosto 2024, kaasoo awood u siinaya Wasiirka Maaliyadda oo kaliya dejinta iyo wax-ka-bedelka dhammaan tacriifadaha saldhiga u ah noocyada kala duwan ee dakhliga Dawladda oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn tacriifadaha dhammaan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada kala duwan;

Isagoo xaqiijinaaya: Dhaqangalka mabda'a lagu sheegay Qodobka 2 (1) (r) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, kaas oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda iyo hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo wax-ku-ool ah;

Markuu arkay: Codsiga Maareeyaha Guud ee Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed, kuna tariikhaysan Juliaay 7, 2025;

Wuxuu halkan ku soo saarayaa Xeer-nidaamiyahan, qodobadiisu yihiin kuwaan soo socda:



Qodobka 1-aad
Magaca iyo Ujeeddada

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa “Xeer-nidaamiyaha Jaangoynta Khidmaddaha Adeegyada Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed¹”.
2. Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan waa jaangoynta khidmaddaha adeegyada ay bixiso Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed, si loo fududeeyo helitaanka adeegyadaas.

Qodobka 2-aad
Jaangoynta Khidmaddaha Adeegyada Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed

1. Cid kasta oo ay Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed u qabanayso adeegyadeeda wuxuu bixinayaa khidmadda ku aadan adeegga loo qabanayo ee lagu jaangoyay Qodobkaan.
2. Khidmaddaha lagu sheegay jaantusyada hoose ayaa noqon doona kuwo la dabaqayo marka uu dhaqan galo Xeer-nidaamiyahaan:

Lr.	Nuuca Adeegga	Khidmaddaha (Oo ah Doolarka Maraykanka)
(1) Adeegyada Faydhowrka Dhirta		
1.1	Shatiga shirkadaha dhoofiya waxyaabaha beeraha ka soo go'a	\$100
1.2	Shatiga shirkadaha soo dejiya waxyaabaha beeraha ka soo go'a	\$150
1.3	Cusbooneysiinta shatiga shirkadaha dhoofinta iyo soo dejinta waxyaabaha beeraha ka soo go'a	\$100
1.4	Ruqsadda soo dejinta waxyaabaha beeraha kasoo go'a (F.G: Ruqsadda waxaa la adeegsan karaa halmar)	\$100
1.5	Ruqsadda soo dejinta muunad (F.G: Muunad soo dejin waxaa ugu badan 2 kg, 1 litre ama 5 geed, waxaana la adeegsan karaa ruqsadda halmar)	\$50
1.6	Ruqsadda dhoofinta muunad (F.G: Muunad dhoofin waxaa ugu badan 2 kg, 1 litre ama 5 geed, waxaana la adeegsan karaa ruqsadda halmar)	\$30
1.7	Shahaadada fayadhowrka dhirta ²	(i) \$50 (wixii ka yar 5 konteenar) (ii) \$100 (5 ilaa 10 konteenar)

¹ Somali Agricultural Regulatory & Inspection Service (SARIS)

² Phytosanitary certificate



		(iii) \$150 (wixii ka badan 10 konteenar)
1.8	Shahaadada fayadhowrka dhirta ee dib-u-doofinta ³	(i) \$50 (wixii ka yar 5 konteenar) (ii) \$100 (5 ilaa 10 konteenar) (iii) \$150 (wixii ka badan 10 konteenar)
1.9	Beddelka shahaadada fayadhowrka dhirta	\$40
1.10	Wax-ka-beddelka shahaadada fayadhowrka dhirta	\$50
1.11	Shatiga shirkadaha beeraha daryeelka dhirta ⁴	\$30
Lr.	Nuuca Adeegga	Khidmaddaha (Oo ah Doolarka Maraykanka)
(2) Adeegyada Kiimikooyinka Beeraha (Bacrimiyaasha Beeraha)		
2.1	Shatiga shirkadaha soo dejiya bacrimiyaasha beeraha	\$300
2.2	Cusbooneysiinta shatiga shirkadaha soo dejiya bacrimiyaasha beeraha	\$150
2.3	Diiwaangelinta bacrimiyaasha beeraha ⁵ (F.G: Diwaangelintu waxay shaqaynaysaa muddo 3 sano ah)	\$300
2.4	Shatiga shirkadaha ka ganacsada bacrimiyaasha beeraha	(i) \$100 (Shirkadaha tafaariiqda) (ii) \$200 (Shirkadaha jumlada)
2.5	Cusbooneysiinta shatiga shirkadaha ka ganacsada bacrimiyaasha beeraha	(i) \$50 (Shirkadaha tafaariiqda) (ii) \$100 (Shirkadaha jumlada)
2.6	Ruqsadda soo dejinta bacrimiyaasha beeraha (F.G: Ruqsadda waxaa la adeegsan karaa halmar)	(i) \$ 50 (wixiii ka yar 10 MT ⁶) (ii) \$100 (10 ilaa 20 MT) (iii) \$25 (halkii MT kasta ee ka dheeri ah 20-ka MT ee ugu horeeya)

³ Re-export phytosanitary certificate

⁴ Nursery registration

⁵ Fertilizer registration

⁶ Metric Ton (MT)



2.7	Ruqsadda soo dejinta muunad (F.G: Muunad soo dejin waxaa ugu badan 2 kg ama 1 litre, waxaana la adeegsan karaa ruqsadda halmar)	\$100
Lr.	Nuuca Adeegga	Khidmaddaha (Oo ah Doolarka Maraykanka)
(3) Adeegyada Kiimikooyinka Beeraha (Dulin-dilayaasha Beeraha⁷)		
3.1	Shatiga shirkadaha soo dejiya dulin-dilayaasha beeraha	\$300
3.2	Cusbooneysiinta shatiga shirkadaha soo dejiya dulin-dilayaasha beeraha	\$150
3.3	Diiwaangelinta dulin-dilayaasha beeraha (F.G: Diwaangelintu waxay shaqaynaysaa muddo 3 sano ah)	\$300
3.4	Diiwaangelinta ku meel gaarka ah ee dulin-dilayaasha beeraha (F.G: Diwaangelintu waxay shaqaynaysaa muddo 1 sano ah)	\$100
3.5	Shatiga shirkadaha ka ganacsada dulin-dilayaasha beeraha	(i) \$100 (Shirkadaha tafaariiqda) (ii) \$200 (Shirkadaha jumlada)
3.6	Cusbooneysiinta shatiga shirkadaha ka ganacsada dulin-dilayaasha beeraha	(i) \$50 (Shirkadaha tafaariiqda) (ii) \$100 (Shirkadaha jumlada)
3.7	Ruqsadda soo dejinta dulin-dilayaasha beeraha	(i) \$50 (wixii ka yar 5 MT) (ii) \$100 (5 ilaa 10 MT) (iii) \$25 (halkii MT kasta ee ka dheeri ah 10-ka MT ee ugu horeeya)
3.8	Ruqsadda soo dejinta muunad (F.G: Muunad soo dejin waxaa ugu badan 2 kg ama 1 litre, waxaana la adeegsan karaa ruqsadda halmar)	\$100
3.9	Shatiga shirkadaha bixiya adeegga buufinta dulin-dilayaasha beeraha ⁸	\$100
3.10	Cusbooneysiinta shatiga shirkadaha bixiya adeegga buufinta dulin-dilayaasha beeraha	\$50

⁷ Pesticides

⁸ Commercial pest control operators



Lr.	Nuuca Adeegga	Khidmaddaha (Oo ah Doolarka Maraykanka)
(4) Adeegyada Abuurka iyo Noocyada Dhirta Beeraha		
4.1	Shatiga gaarka ah ee shirkadaha ka ganacsada abuurka dalka	\$350
4.2	Shatiga gaarka ah ee shirkadaha soo dejiya abuurka khudaarta	\$400
4.3	Shatiga gaarka ah ee shirkadaha soo dejiya abuurka calafka	\$200
4.4	Shatiga guud ee shirkadaha ka ganacsada abuurka dalka, soona dejiya abuurrada khudaarta iyo calafka	\$600
4.5	Cusbooneysiinta shatiga gaarka ah ee shirkadaha ka ganacsada abuurka dalka	\$175
4.6	Cusbooneysiinta shatiga gaarka ah ee shirkadaha soo dejiya abuurka khudaarta	\$200
4.7	Cusbooneysiinta shatiga gaarka ah ee shirkadaha soo dejiya abuurka calafka	\$100
4.8	Cusbooneysiinta shatiga guud ee shirkadaha ka ganacsada abuurka dalka, soona dejiya abuurrada khudaarta iyo calafka	\$300
4.9	Baaritaanka abuurka ee shaybaarka	\$30
4.10	Shahaadada abuurka beeraha ⁹	\$50
4.11	Diiwaangelinta noocyada abuurada	\$250

Qodobka 3-aad Habka Bixinta iyo Ururinta Khidmaddaha

1. Khidmadaha adeegyada Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed ee lagu jaangooyay Qodobka 2-aad ee Xeer-nidaamiyahaan waxaa qaadi kara oo keliya saraakiisha dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ee loo igmaday qabashada khidmadaha adeegyada ay bixiso Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed, si waafaqsan hannaanka maamulka dakhliga.

⁹ "LOT-ka" waxaa lagu saleyn doonaa nooca abuurka, sida uu qabo halbeegga Ururka Caalamiga ah ee Tijaarada Abuurka (ISTA).



2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaaya khidmadaha lagu cayimay Qodobka 2-aad ee Xeer-nidaamiyahaan waxay khidmadahaas ku shubi karaan oo keliya koontooyinka dakhliga aan cashuurta ahayn ee Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka ee Soomaaliya uga furan Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ama koontooyinka kale ee ka furan bankiyada kale ee gaarka loo leeyahay oo ay Wasaaradda Maaliyadu cayinto.

3. Waa mamnuuc in saraakisha dakhligu u qabtaan khidmadaha si caddaan ah. Dhammaan khidmadaha waa in lagu shubaa koontooyinka dakhliga ee aan cashuurta ahayn ee Wasaaradda Maaliyadda ee la cayimay.

Qodobka 4-aad **Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan**

1. Xeer-nidaamiyahan Jaangoynta Khidmaddaha Adeegyada Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed waxa uu dhaqan-gelaya taariikhda uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda.

2. Nuqullada Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu faafinaya bogga internetka ee Wasaaradda Maaliyadda. Waxaa sidoo kale lagu faafin karaa bogga internetka ee Hay'adda Sharciyeynta Adeegyada iyo Baaritaanka Beeraha Soomaliyeed.

Fulin wacan,

Bth 30/7/2025
Xil. Biixi Iimaan Cige
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

